

LAANTA SHARCIGA EE MAINE

Dacwoodaha

MAXKAMADDA DEGMADA

Goobta (Magaalada): _____

Lambarka Dacwadda: _____

☐ shaqsi ahaan ah **iyo** ka wakiil ah:

☐ ka wakiil ah:

V.

Eedeysanaha

☐ ka wakiil ah:

DOODA DACWOODAHA EE AH KORDHINTA AMARKA ILAALINTA

☐ oo ay la socoto codsi wax-ka-beddel ee amarka la kordhiyay

19-A M.R.S. § 4111, 5 M.R.S. § 4655(2)

FADLAN OGOW: Waa inaad gudbisaa foomka PA-027 haddii aad tan si elektaroonig ah u gudbinayso. Haddii aadan sidaas samayn waxaa ka dhalan doonta in Dooda la diido.

1. Waxaan ka helay Maxkamaddan Amarka Ilaalinta ee ka dhanka ah eedeysanaha.

☐ Amarkaas weli ma dhammaan wuxuuna dhammaan doonaa (mm/dd/yyyy) _____.
ama

☐ Amarku wuu dhammaaday markay ahayd tariikhda (mm/dd/yyyy) _____. Anigu ma
gudbin dooda ka hor inta uusan Amarka Ilaalintu dhammaan sababtoo ah: _____

(Haddii doodaadu la gudbiyo kadib marka Amarka Ilaalintu dhammaado, maxkamaddu waxay kordhin kartaa
amarkaaga keliya haddii ay ogaato inay jirto sabab wanaagsan oo mooshinka loo gudbiyay kadib dhammaadka
amarka iyo in mooshinka lagu gudbiyay muddo macquul ah gudaheed.)

2. Waxaan aaminsanahay in kordhinta Amarka Ilaalinta ay lagama maarmaan u tahay ilaalintayda iyo/ama carruurtayda aan qaan-
gaarin sababaha soo socda awgood:

SIDAAS DARTEED, waxaan maxkamadda ka codsanayaa inay:

Ogeysiiska ADA: Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA).
Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriiir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama
karraaniga maxkamadda.

Adeegyada Luqada: Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriiir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

LAANTA SHARCIGA EE MAINE

(a) Kordhiso Amarkayga Ilaalinta ee ka dhanka ah eedeysanaha muddo dhan (*muddada kordhinta la codsanayo*):

_____.

(b) ☐ Waxaan sidoo kale codsanayaa in Amarkayga Ilaalinta ee la kordhiyay loo beddelo ama wax looga beddelo sida soo socota:

(c) Haddii dhageysiga doodaan aan la qaban karin ka hor inta Amarka Ilaalintu dhammaan, waxaan maxkamadda ka codsanayaa inay sii waddo Amarka inuu sii shaqeeyo ilaa laga gaarayo dhageysiga mooshinkan in la kordhiyo.

☐ Waxaan ku dhaaranayaa, anigoo og ciqaabta ka dhalan karta been ku dhaarashada, in bayaannada kor ku xusan ay yihiin kuwo run ah oo sax ah. Waxaan fahamsanahay in bayaannadan loo isticmaali doono caddeyn maxkamadeed, iyo in aan la iigu qaadi karo dacwad been ku dhaarasho ah oo la iigu ciqaabi karo ilaa 5 sano oo xabsi ah iyo ganaax gaaraya \$5,000.00 haddii aan maxkamadda siiyo macluumaad been ah.

Tariikhda (mm/dd/yyyy): _____



Saxiixa Dacwoodaha

FADLAN OGOW: Haddii aad dacwadadan si elektaroonig ah u gudbinayn, waa in karraaniga maxkamadda ama nootaayo haaya uu hoos kuu saxiixo. Haddii aad dacwadadan si elektaroonig ah u gudbinayso, waxaad u gudbin kartaa adigoo notary (saxiix xaqiijin) haysan, ilaa aad saxdo caddeynta kore oo aad saxiixdo dukumiintigan.

GOBOLKA MAINE

GOBOLKA _____

Shakhsi ahaan ayuu u soo muuqday qofka kor ku magacaaban, _____, wuxuuna ku dhaartay in bayaannada kor ku xusan ay run yihiin isagoo og ciqaabta ka dhalaneysa been ku dhaarashada.

Tariikhda (mm/dd/yyyy): _____



☐ Karraani ☐ Nootaayada Dadweynaha ☐ Qareen

OGEYSIIS DHAGEYSI

Dhinacyada waxaa lagu wargelinayaa in dhageysiga arrintan loo qabtay taariikhda (mm/dd/yyyy) _____ saacadda _____ ☐ AM ☐ PM, laguna qabanayo maxkamadda ku taala: _____.

DIGNIIN MUHIIM AH: Haddii aadan kasoo muuqan maxkamadda waqtiga kor ku xusan, ama waqti kasta oo maxkamaddu kuugu yeerto, maxkamaddu waxay kordhin kartaa Amarka Ilaalinta adigoo joogin. Maxkamaddu waxay oggolaan kartaa qaar ama dhammaan gargaarka uu codsaday dacwooduhu. Ku xad-gudubka amarka bad qabka ah wuxuu noqon karaa dembi Heerka D ah ama ku-xadgudub maxkamadeed. Haddii aad damacsan tahay inaad ka hortagto mooshinkan kordhinta, ha ka maqnaan waqtiga lagaa rabo inaad kasoo muuqato. Waxaad ka heli kartaa buug macluumaad ku saabsan kiisaska ka-hortagga xadgudubka/dhibaataaynta maxkamadda ama bogga internetka ee maxkamadda.

AMAR QAYBTA HORE AH OO KORDHINAYA AMARKA ILAALINTA

Ogeysiiska ADA: Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.

Adeegyada Luqada: Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.

LAANTA SHARCIGA EE MAINE

- ☐ Dacwooduhu wuxuu gudbiyay dood lagu kordhinayo **ka hor** inta uusan dhammaan Amarka Ilaalinta ee asalka ahaa.
- ☐ Dhageysiga dood kordhinta waxaa loo qorsheeyay **dhicitaanka waqtiga kadib** ee Amarka Ilaalinta ee hoose ku xusan. Maxkamaddu waxay halkan ku kordhinaysaa Amarka Ilaalinta ilaa laga gaarayo dhageysiga dood kordhinta; ama
- ☐ Dhageysiga dood kordhinta waxaa loo qorsheeyay **dhicitaanka waqtiga kahor** ee Amarka Ilaalinta ee hoose ku xusan. Haddii maxkamaddu dib u dhigto dhageysiga taariikh ka dambeysa dhicitaanka waqtiga kadib ee Amarka Ilaalinta, Amarka si toos ah ayaa loo kordhin doonaa ilaa laga gaarayo dhageysiga dood in la kordhiyo.

AMA

- ☐ Dacwooduhu wuxuu gudbiyay mooshinka kordhinta **kadib** markii uu dhammaaday Amarka Ilaalinta ee asalka ahaa.
- ☐ Maxkamaddu waxay halkan dib ugu soo celinaysaa Amarka Ilaalinta ee dhammaaday ilaa laga gaarayo dhageysiga dood ah in la kordhiyo iyadoo lagu saleynayo waxyaabaha Maxkamaddu ay heshay, iyadoo la raacayo 19-A M.R.S. § 4111(1-A), taaz: (1) dacwooduhu wuxuu muujiyay sabab wanaagsan oo uu dood kordhinta ugu gudbiyay kadib dhicitaanka waqtiga Amarka Ilaalinta, iyo (2) mooshinka kordhinta lagu gudbiyay muddo macquul ah gudaheed iyadoo lagu saleynayo duruufaha jiray; ama
- ☐ Maxkamaddu dib uma soo celinayso Amarka Ilaalinta ee dhicitaanka waqtiga sababtoo ah dacwooduhu muusan muujin in shuruudaha 19-A M.R.S. § 4111(1-A) la buuxiyay.

Fadlan ogow: haddii Amarka Ilaalinta dib loo soo celiyo ama la kordhiyo ilaa dhageysiga dood kordhinta, jebinta Amarka waxay noqon kartaa dembi Heerka D ah keliya haddii eedeysanuhu hore u helay ogeysiis dhab ah oo ku saabsan kordhinta.

Nuqullada Amarkan waxaa karraanigu siin doonaa hay'adda sharci fulinta ee leh awoodda goobta uu deggan yahay dacwooduhu.

Waxaa la AMRAY in nuqul ka mid ah Amarkan loo gudbiyo eedeysanaha iyadoo loo marinayo: _____
(hay'adda fulinta sharciga)

Tariikhda (mm/dd/yyyy): _____



Garsoore, Maxkamadda Degmada

SOO CELINTA ADEEGA

Markay ahayd Taariikhda (mm/dd/yyyy) _____ saacadda _____ ☐ AM ☐ PM, waxaan gaarsiiyay Dooda Kordhinta Amarka Ilaalinta/Amarka Kordhinta anigoo nuqulka gacanta ku siiyay eedeysanaha meel ku taala:

Taariikhda dhalashada eedeysanaha (mm/dd/yyyy): _____

Tariikhda (mm/dd/yyyy): _____



Saxiixa Sarkaalka Idman

Magaca la daabacay ee Sarkaalka Idman

Hay'adda Sharci Fulinta

Ogeysiiska ADA: Laanta Garsoorka ee Maine waxay u hoggaansantaa Xeerka Maraykanka ee Naafonimada (Americans with Disabilities Act, ADA). Haddii aad u baahan tahay fududeyn macquul ah, la xiriir Isuduwaha Helitaanka Maxkamadda oo ah, accessibility@courts.maine.gov, ama karraaniga maxkamadda.

Adeegyada Luqada: Wixii ah caawimaada luqadda iyo turjubaannada, la xiriir karraaniga maxkamadda ama interpreters@courts.maine.gov.